



Kulanka dhageysiga guddiga ee dugsiyada dhexe

Guddiga Dugsiga PPS waxay qaban doontaa dhageysi labaad oo ku saabsan soo jeedinta ah in la furo laba dugsi dhexe oo cusub Harriet Tubman iyo Roseway Heights.

GOORTA: 6 galabnimo-7:30 fiidnimo, Isniinta Sibtambar 25

GOOBTA: Xarunta Adeega Waxbarashada Blanchard (BESC), 501 N. Dixon St., Portland, 97227

WAXA LAGA HADLAYO: Dhiibo ra'yigaaga, fikradahaaga, talooyinkaaga ku saabsan soo jeedinta dugsiyada dhexe

Abriil, Guddiga PPS waxay degmada u tilmaantay in marka la gaaro dayrta 2018-ka ay laba dugsi dhexe ka furto Harriet Tubman iyo Roseway Heights. Ujeedada ka dambeysa tilmaantan waa sidii loo xaqiijin lahaa in dhammaan ardayda fasalka dhexe gaar ahaan kuwa la takooray iyo bulshooyinka taariikh ahaan cid matalaysaa aanay jirin, ay u heli lahaayeen wax helitaan loo wada siman yahay oo ku aadan waxbarasho wanaagsan oo u diyaarisa ah in ay guuleystaan dugsiyada sare iyo wixii ka dambeeya.